

XUQUUQDA RACFAAN-QAADASHADA (APPEAL RIGHTS)

Dib-u-tixgelinta (Reconsideration): Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in Garsooraha Sharciga Maamul (Administrative Law Judge, ALJ) uu dib u tixgeliyo Amarka Kama dambaysta ah. Xeerka Dib Loo Eegay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 34.05.470 iyo Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 388-02-0605. Codsigaagu waa inuu ahaadaa qoraal waana inuu ku hela ALJ toban (10) maalmood gudahooda kadib taariikhda boostada laguugu soo diray Amarka Kama dambaysta ahaa. Waxaad isticmaali kartaa foomka Codsiga Dib-u-tixgelinta ee ku lifaaqan meeshan. Haddii codsiga dib u tixgelinta lagu helin muddada tobankan maalmood gudahooda, lama tixgalin doono, oo wakhtiga looga codsanayo dib-u-eegista maxkamadda sare ayaa sii soconaya. U dir codsigaaga ciwaanka soo socda:

Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka
PO Box 42489 Olympia, WA 98504
Telefoonka: (800) 845-8830
Fakiska:

Haddii codsiga dib-u-tixgelinta lagu soo gudbiyo wakhtiga loogu talagalay, ALJ waxa uu haystaa labaat (20) maalmood si uu u go'aamiyo codsiga ama uu kuugu soo diro adiga iyo dhinacyada kale ogeysiis qoran oo qeexaya taariikhda ALJ uu go'aamin doono codsiga. Codsiga dib-u-tixgelinta waa la diidayaa haddii wax tallaabo ah uu qaadi waayo ALJ muddada labaatanka maalmood gudahooda ah. Haddi codsiga lagu soo gudbiyo wakhtiga loogu talagalay, wakhti jadwaleedka lagu codsanayo dib u eegista maxkamada sare waxay bilaaban doontaa taariikhda amarka dib u tixgelinta la soo diray.

Dib u eegista Maxkamada Sare (Superior Court Review): Waxa kale oo aad xaq u leedahay in aad rafcaan uga qaadato Amarka Kama dambaysta ah maxkamada sare sodon (30) maalmood gudahooda kadib taariikhda boostada laguugu soo diray Amarka Kama dambaysta ah. RCW 34.05.542(3) iyo WAC 388-02-0645. Uma baahnid inaad xaraysato codsi dib-u-tixgelin ka hor inta aanad ka codsan dib-u-eegis maxkamad sare. Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada (Department of Health and Social Services, DSHS) kama codsan karto dib u eegis maxkamad sare. Fadlan ka tixraac Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 388-02-0650 wixii macluumaad ah ee ku saabsan sida loogu gudbiyo codsigaaga dib u eegista maxkamad sare.

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.

Magaca:		Lambarka	Lambarka Kiiska
		Aqoonsiga	
Cinwaanka:		Lambarka	
		Hay'adda	
Magaalada:	Gobolka:	Koodhka	
		Zip-ka:	
Telefoonka:			

- Sababta aad ugu malaynayso in Amarka uu khaldan yahay (maxaad u khilaafsan tahay iyada).
- Sida aad u rabto in Amarka wax looga beddelo.
- Muhiimada xaqiiqooyinka qaarkood ee ay tahay in Garsooraha Sharciga Maamul uu tixgeliyo.

Saxiixa

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.